



Talada diirimaadka xilliga jiilaalka (qabowga) ee adiga iyo gurigaaga

Caawinaadka diirimaadka iyo
samaqabka xilliga jiilaalkan

❄️ Caawinaadka qarashyada tamarta

- Goobaha diiran ee bulshada
- Qiimaha taageerada noloshu

❄️ Sidee buu adiga kuu dhibi karaa qaadida hargabku





Miyaad ka welwelsan tahay qarashyada tamarta?

Talobixiyaha Muwaadiniinta ee Manchester waxay la shaqaynaysaa Cadent - shirkadda bixisa gaaska ee guryaha Manchester.



Waxay ku siinayaan adeeg **bilaash** ee xafidsan si ay kaa caawiso:

- Xaqiijisid inaad awoodo inaad hesho taageero dhaqaale
- Maarenta deynta tamarta
- Inaad kaydsato qarashyada tamarta
- Xaqiijisid in helida tamartaadu ay badbaado tahay
- Inaad hesho kulayliye guri ee cusub ama ka wanaagsan

Taleefanka: 0808 164 4406

Khadadka waxay furan yihiin Isniinta ilaa Jimcaha 9 subaxnimo ilaa 5 galabnimo

Waxaa laga yaabaa inaad awoodo inaad qarash kaydsato ama aad isticmaasho kaarboon ka yar adigoo:

- Inaad u bedeshid isticmaashid LED-ka
- Maalgelinta qalabka tamarta waxtarka leh
- Helitaanka miitarka casriga (smart)
- Inaad u bedeshid tamarta cagaaran



Dayactirka guriga

Haddii aadan haysan kuleyliye ama u baahan dayactir guri oo degdeg ah haddana aad ka weyn tahay 60 jir oo haddana aad tahay qof dakhligiisu yar yahay, la xiriir

Telefoonka Daryeelka iyo Dayactirka ee Manchester:
Telefoon: 0161 872 5500

www.careandrepair-manchester.org.uk



Energise Manchester

Waxay bixin doontaa waxqabadyo kala duwan oo bulshada ku salaysan oo ku saabsan tamarta guriga - laga bilaabo tababbarka waxyaabaha la taaban karo si loo horumariyo waxtarka tamarta, iyo la shaqaynta horyaalada caafimaadka xaafaddaada iyo dhacdooyinka xarumaha bulshada ee deegaanka.

Fiiro dhacdooyinka Energise Manchester iyo dhacdooyinka tamarta ee kuu dhow.



Khadka la-talinta qiimaha nolosha ee bilaashka ah ee Manchester

Khadka Talo-bixinta Qiimaha Nolosha ee bilaashka ah ayaa kaa caawin kara:

- Lacagta Kaalmada iyo caawinta kiradaada
- Talooyin ku saabsan deynta iyo bixinta qarashyada
- Taageerada cuntada
- Taageerida helitaanka onlaynka

Telefoon: 0800 023 2692

Khadadka waxay furan yihiin Isniinta ilaa Jimcaha
9am ilaa 4.30pm ama fariin Qoraal: 07860 022 876
www.manchester.gov.uk/helpinghands



Tallaalka hargabka

Qaaditaanka hargabku waxay dhib kugu keeni kartaa:

- Waqtigaaga
- Qorshahaaga
- Lacagtaada
- Caafimaadkaaga

Haddana adiga keliya ma aha. Hargabku waxay dadku ka dhigi kartaa inay aad u xanuunsadaan, sida kuwa aadka u yaryar, ama waayeelka ah, ama haweenka uurka leh iyo dadka qaba dhibaatooyinka caafimaad.

Tallaalka hargabku waa badbaado wuuna shaqeeyaa.

Waa bilaash oo way fududahay in la helo - hadda hubso haddii ay tahay inaad qaadato:

www.manchester.gov.uk/flujab



Haddii aad u qalanto talaalka hargabka waxaad kale awoodi kartaa inaad hesho tallaalka Covid ah oo bilaash ah.



Haddii aad u baahan tahay tallaalka hargabka laakiin aadan ka mid ahayn kooxaha la soo waco oo lacag la'aan ku hela, iskaaga ayaad talaalka iska bixin kartaa farmashiyaha xaafadda.

Ka wac khadka telefoonka talada bilaashka ah ee Manchester: 0800 023 2692

Khadadka waxay furan yihiin Isniinta ilaa Jimcaha 9am ilaa 4.30pm ama fariin Qoraal: 07860 022 876

www.manchester.gov.uk/helpinghands



Macluumad la turjumay

Macluumaadka ku jira buug-yarahaan waxaa lagu heli karaa luqado kale manchesterlco.org/winter-warmth-advice-booklets/